Caddad Gaar ah oo ku aaddan Caafimaadka/Nafaqeynta

Warsidaha UNICEF Soomaaliya Abril 2009

La dagaallanka duumada si loo wanaajiyo caafimaadka carruurta iyo haweenka

Waxaa qorey Christian Balslev-Olesen
Wakiilka UNICEF Somalia

UNICEF waxa ay weligeed ku dadaaleysaa yareynta nisbooyinka dhimashada iyo silica dhallaanka, carruurta iyo haweenka Soomaaliyeed nisbooyinkaas oo ka mid ah kuwa ugu sarreeya dunida oo dhan.

Sida lagu ogaadey Sahanka UNICEF ay sameysey ee *Multiple Indicator Cluster Survey(MICS)* 2006, Nisbada Dhimashada Hooyada ayaa ah 1,044 hooyo 100,000 ee nolol ku dhala iyo Nisbada Dhimashada Carruurta ka yar shan sano jirka oo ah 135 carruur ah 1,000 nolol ku dhashaba iyada oo qaar ka mid ah dhimashadaan gaar ahaan tan carruurta loo nisbeyn karo duumada.

Dadaalkeeda ay ku hubineyso in caafimaad wanaagsan loo helo carruurta iyo haweenka, UNICEF Somalia waxa ay ku dadaaleysaa gaaridda Yoolalka Horumarka ee Kun-sanadka (MDG) oo ah yareynta dhimashada carriirta; wanaajinta caafimaadka hooyada iyo la dagaallanka HIV/AIDS, duumada iyo cudurrada kale.

Mid ka mid ah hababka lagu gaarayo yoolalkaan ayaa ah iyada oo la xoojiyo dadaallada xakameynta iyo ka hortagga duumada. Duumada ayaa Soomaaliya ka ah dhibaato weyn oo caafimaad iyada oo 5 ilaa 20% ka noqoneysa dhammaan cudurada ay qabaan dadka soo booqda xarumaha caafimaadka. Iyada oo la qiyaasay in 608,831 ay ku dhacdey oo ay 3,491 lagu soo waramey in ay u dhinteen 2008da (waxaa laga soo xigtey Warbixin Sanadeedda WHO ee 2008), duumada ayaa weli Soomaaliya ka ah dhibaato caafimaad oo weyn oo u baahan hab la iska kaashado oo lagu xakameynayo. Celceliska isu gudbinta ayaa hooseeya oo aan deganeyndegaannada ballaaran ee qaybta bartamaha iyo waqooyiga dalka laakiin isugudbin sarreeysa oo degaan ku kooban ayaa halis ku haysa dhammaan koox-da'eedka kala duwan.

Faaduma Sheekh Muuddey iyo carruurteeda oo ku nool xero dadka soo barokacay ay Garoowe ku leeyihiin, waxa ay ka faa'iideysatey qaybinta marokaneecada.© UNICEF Somalia/2009

Haweenka uurka leh iyo carruurta ka yar shan sano jirka ayaa dhibaatada ugu weyn ay ka soo gaartaa cudurka. UNICEF Somalia oo maaliyad ka heshey Sanduuqa Caalamiga ah ee la dagaallanka AIDS-ka, Qaaxada iyo Duumada (GFATM) ayaa isuduweysey oo taageereysay hirgelinta Barnaamijka Ka Hortagga iyo Xakameynta Duumada ee Soomaaliya oo dhan iyada oo kaashaneysa Wasaaradaha Caafimaadka, maamullada degaanka, NGO-yada iyo Ururada Bulshada Ku Dhisan.

Xakameynta duumadu waxa ay u baahan tahay hab geeso badan leh oo beegsanaya dulinka (kaneecada) ka mas'uulka ah gudbinta cudurka iyo ku-dul-noolaha (*parasite*) cudurka dadka ku dhaliya sidaana lagu gaaro ka hortagga iyo daaweynta duumada. Si looga hortago duumada, UNICEF waxa ay qaadatey istiraatiijiyad bulsho weynta loogu qaybinayo marokaneecooyinka daweysan ee cimriga dheer taas oo la doonayo in dhammaan qoysaska ku nool meelaha ay duumadu ku badan tahay lagu gaarsiiyo laba xabbo oo marokaneeco ah.

Eeg bogga 2aad

Olalaha Maalmaha Caafimaadka Carruurka Soomaaliyeed oo markii ugu horreysey wada gaarey dalka oo dhan

Markii ugu horeysey oo ay Soomaaliya ka dhacdo, ayaa ololaha Maalmaha Caafimaadka Carruurta ay dalka oo dhan ka fuliyeen UNICEF, Ururka Caafimaadka Adduunka, NGO-yo, wasaaradaha caafimaadka iyo maamullada degaanka oo kaashanaya bulshooyinka iyo la-hawlgalayaasha aan dowliga ahayn (NGO-yada). Maalmaha Caafimaadka Carruurta waxa ay daryeelka caafimaadka ka qaadaan xarumaha caafimaadka waxaana ay toos u gaarsiiyaan bulshada iyaga oo u marinaya boqollaal tallaalayaal iyo shaqaalaha caafimaadka ah – iyaga oo hoos u dhigaya caqabadaha hor istaaga soo gaaritaanka (gaadiidka, ammaanka, iyo kharashka) oo halkaana lagu abuurayo buundo isku xirta xarumaha caafimaadka iyo guryaha/qoysaska. Xubnaha dadka degaanka ayaa la abaabulaa si ay haweenka iyo carruurta maalmo gaar ah u keenaan goobo dhexe oo dadweynuhu leeyihiin si ay u qaataan xirmooyin waxqabadyo caafimaad iyo nafaqeyn oo saameyn sare leh oo ay ku jiraan tallaallada jadeecada, dabaysha, qummanka, xiig-dheerta, iyo kojiyaha teetanada), bixinta Fitamiin A, goryaan ka dilid, iyo cusbada fuuqcelinta, biyo guriga lagu nadiifsado oo carruurta la siiyo iyo tallaalka teetanada ee haweenka. Habkaan ayaa laga soo qaatey guulihii la gaarey gaar ahaan ololayaashii ballaarnaa ee hore looga qaadey jadeecada iyo sidoo kale waxqabadyada dabargoynta cudurka dabeysha. Olaha Maalmaha Caafimaadka Carruurta waxa uu Soomaaliland ka bilowdey bishii Disembar 2008da waxaana ay qaadatey laba bilood in lagu gaaro dhammaan gobollada. Bishii Maarso 2009ka, ayaa Maalmaha Caaafimaadka Carruurta waxa ay ka bilowdeen Bartamaha/Koonfurta Soomaaliya.

Eeg bogga 4aad...

CADDADKAAN KA EEG

Faallada Wakiilka	1/2
Maalmaha Caafimaadka Carruurta oo faafey	1/4
Fogeynta cudurka duumada	2
Xerooyinka Dadka Gudaha Ku Barokacay oo la Ilaaliyey	3
Kor u qaadidda qaybinta marokaneecooyinka	3
La dagaallanka nafaqo-xumada	4
Tusaha – Maalmaha Caafimaadka Carruurta	5
Maalinta Duumada Adduunka	5
Nagala soo xiriir	5

2008dii waxaa Soomaaliya laga soo sheegey 608,831 duumo ku dhacdey iyo 3,491 u dhintey…

UNICEF ©Carruurteenna

Fogeynta duumada iyada oo loo marayo ka hortagga iyo daaweynta bulshada ku dhisan

Meel 50 Km waqooyiga magaalada Hargeysa ah oo ka tirsan degmada Gabiley ee Waqooyiga Galbeed ee Soomaaliya ("Somaliland") waxaa ku taalla tuulada Cagobar. Tuulada waxa ay ku taallaa degaan beeraley ah oo si weyn loogaga faa'iideysan karo beeraha waraabka ah maaddaama uu dhulkeedu simman yahay. Bishii Nofembar 2006dii ayaa Wasaaradda Caafimaadka iyo Shaqada ay u aqoonsatey tuulada Cagobar in ay tahay degaan cudurka Duumada ku faafo iyada oo ku taalla meel guud ahaan ay duumadu ku yar tahay ka dib markii 52 xaaladood oo duumo ah lagu soo sheegey laba toddobaad gudahooda.

Arrintan ayaa abuurtey dardar lagu taageerayo sidii bulshada Cagobar ay ula dagaallami lahaayeen duumada. Ilaa waqtigaas waxaa arrintaa waday rug caafimaad oo qof shaqaale caafimaad ah uu si iskaa wax u qabso ah ugu shaqeynayey, rugtaas oo awood yar u lahayd in ay si taabogal ah u baarto una daweyso duumada. Culays kale ayaa ahaa in kasta oo ay heli kareen daawada duumada, in haddana aan looga faa'iidesan si taabogal ah oo waafaqsan habraacyada qaranka ee daaweynta duumada.

Muddadaa dabadeed, Wasaaradda Caafimaadka iyo Shaqaalaha oo gacan ka heleysey UNICEF ayaa Rugta Caafimaadka ee Cagobar u aqoonsatey in ay tahay mid lagu tijaabiyo daaweynta cusub ee duumada iyada oo la tababarey Cabdi Cumar Askar oo ah shaqaale caafimaad oo bulshada ka socda si uu u maamulo rugtaa caafimaad. Waxaa sidoo kale la siiyey Xirmada Baaridda Degdegga ah ee duumada (RDT) iyo daawada lagu taliyey ee ay la isku daro ee ay salka u tahay *Artemesinin - Artemesinin-based Combination Therapy (ACT)*. Marka laga soo tago keenista daaweynta duumada ee taabogalka ah, UNICEF waxa ay taageertey laba NGO si ay u fududeeyaan in ay bulshada Somaliland ka munaaqashooto duumada. Waxaa ay sidoo kale qabanqaabisey maalinta duumada ee degaanka si bulshada wax looga baro duumada ka dibna Marokaneecooyinka Cimriga Dheer ee La Daweeyey looga qaybiyo tuulada Cagobar iyada oo halkii qoysba helayo 2 xabbo

Cabdi Cumar Askar (bidix) oo ka shaqeeya Rugta Caafimaadka ee Cagobar oo uu la joogo qof soo booqdey.© UNICEF Somalia /2009

oo marokaneecooyinkaa ah. Wareysi ay UNICEF la yeelatey, waxa uu Cabdi Cumar ku sheegey in habraacyada cusub ee daaweynta ay fududeeyeen xakameynta, ka hortagga iyo daaweynta duumada. "Waqtiyadii hore, bukaan kasta oo ay xummad hayso waxaa laga daweyn jirey duumo, laakiin hadda iyada oo ay mahaddeeda leeyihiin UNICEF iyo Barnaamijka Sanduuqa Caalamiga ah ee la dagaalladanka Duumada iyo Xirmada Baaritaanka Degdegga ah, waxa aan awood u leenahay in aan xaqiijinno haddii uu xannuunku yahay duumo oo markaana aannu raacinno daaweynta, ayuu yiri.

Baaritaanka Degdegga ah waxa uu awood inoo siinayaa in aan daaweynta ACT u bixinno si waafaqsan da'da bukaanka iyo habraacyada daaweynta. Haddii cudurka laga waayo qofka, waxaa kale oo laga baaraa waxyaabaha kale ee xannuunka keeni kara.

Habka waxbaridda bulshada oo kulmisa dhiirrigelinta munaaqashada iyo maalmaha ka wacyigelinta dadka duumada ayaa gacan ka geysatey in uu kor u kaco wacyiga dadku ay ka qabaan duumada iyo qaybinta Marokaneecooyinka Daaweysan ee Cumriga Dheer. Marokaneecooyinka ayaa ay hadda isticmaalayaan badi qoysaska waxaana ay yareeyeen duumada tuulada Cagobar. Keliya saddex qof ayaa laga heley bilihii Jannaayo ilaa Maarso ee 2009ka.

Maxamed Qalinle oo ah guddoomiiyaha bulshada Cagobar ayaa sidoo kale sheegey fikirkiisa ku aaddan muhiimadda waxbaridda bulshada, iyo kor u qaadidda wacyiga bulshada gaar ahaan sida habboon ee loo isticmaalo Marokaneecooyinka Daaweysan ee Cimriga Dheer. "Waa aan ka faa'iidney hindisahan, rugteena caafimaadkana waa ay wanaagsanaatey. Waxa aan carruurteena iyo haweenkeena uurka leh ee qaba duumada u diri jirney Hargeysa oo ay xarunta kale ee caafimaad ee noogu dhow ku taalley. Hadda waxa aan marka hore ku baarnaa rugteenna caafimaad, shaqaalaha rugteena caafimaadka ayaa na siiya talada ugu habboon iyo daawadaba. "Wax

Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada *Gabiley, Cabdi Cumar ee heley tababar gaar ah oo ku saabsan ka hortagga iyo daaweynta duumada. © UNICEF Somalia /2009*

soo saarka beeraha ee dadka ayaa kor u kacay sababta oo ah jiradooda oo yaraatey. Waxa aan u mahadcelineynaa dhammaan kuwa gacanta ka geystey sidii aannu u xallin lahayn dhibaatada duumada ee tuulada Cagobar iyo deegaankeeda. Hadda waxa aan leenahay tamar aan wax kale ku qabsanno."

La dagaallanka Duumada si loo wanaajiyo caafimaadka carruurta iyo haweenka *Ka yimid bogga 1aad*

Marka laga soo tago in ay jir ahaan u difaacdo, marokaneecada daweysan waxa ay ceyrisaa kaneecada gudbisa duumada. Marokaneecada daaweysan ayaa ay ka-faa'iideystayaashu ku helayaan lacag la'aan. Iyada oo xarumaha caafimaadka u soo iibisey una qaybisey qalabka lagu baaro iyo daawada duumada, ayaa UNICEF iyo ururada la-hawlgala waxa ay qayb ka qaadanayaan in si habboon loo baaro loona ogaado jiritaanka duumada.UNICEF iyo la-hawlgalayaasheedu waxa ay sidoo kale hubinayaan daaweyn taabogal ah iyada oo la adeegsanayo habka daaweynta la isku daro ee ay salka u tahay *Artemensining* (ACT) ee caalami ahaan lagu taliyey. Arrintan ayaa lagu xoojiyey taageero la siiyey ku tababaridda dhammaan shaqaalaha caafimaadka habraacyada daaweynta duumada.

Maaddaama haweenka uurka leh ay halista ugu weyn ugu jiraan duumada, UNICEF waxa ay dhaqangelineysaa istiratiijiyadda ka hortagga duumada ee meelaha ay halista isu gudbinta cudurku ku badan tahay ee bartamaha/koonfurta Soomaaliya. Ka sokow isticmaalka marokaneecooyinka daaweysan, haweenka uurka leh waxa lagu dhiirigeliyaa in ay booqdaan xarumaha caafimaadka inta ay uurka leeyihiin si ay u helaan daryeelka ka horreeya dhallidda ee ay ka mid yihiin tallaalka, nafaqada dheeriga ah iyo daaweynta ka hortagga ah ee duumada. Dhammaan dadaalladani waxaa taageera hab adag oo waxbarashada iyo ka wacyigelinta duumada ah kaas oo ku taamaya in uu kor u qaado wacyiga, uuna taageero oo uu abaabulo bulshada si ay u soo gaarto adeegyada laga bixinayo dham maan Soomaaliya. Iyada oo dadaalkan qayb ka ah, ayaa 25kii Abriil, waxa ay la-hawlgalayaasha ay UNICEF taageerto oo 14 goobood oo Soomaaliya ka mid ahi u dabaaldegeen Maalinta Duumada Adduunka. UNICEF waxa ay u mahadcelineysaa Sanduuqa Caalamiga ah taageeradii maaliyadeed ee uu siiyey Soomaaliya waxaana ay sii wadi doontoo taageeridda hay'adaha caafimaadku ku korcinayaan si wanaagsan u maareynta xogta; baaritaanka sheybaarka; ogaanshaha duumada faafeysa iyo fulinta waxqabadyada lagu xakameynayo duumada. UNICEF waxa ay fursaddan uga faa'iideysaneysaa in ay u mahadceliso maamullada degaannada, NGO-yada la hawlgala iyo ururada bulshada ku dhisan oo gacanta ka geysanaya dagaalka lagula jiro duumada.

Habka daaweynta duumada ee caalamiga ah oo Soomaaliya ka jira…

Marokaneecooyinka ayaa dadka xerooyinka baracakayaasha deggan isaga ilaalinayaan kaneecada

Kow iyo toban sanno ka hor, Faadumo Sheekh Muuddey waxa ay timid xerada dadka gudaha ku barokacay ee Garoowe ee ku taalla Waqooyiga Bari ee Soomaaliya ('Puntland') ka dib markii ay ka soo carartey rabshadda maliishiyaadka ee Qallaafe ee gobolka Shabeellaha Hoose, ee Koonfurta Soomaaliya. Xerada Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Garoowe waxa ay ka kooban tahay siddeed degaan oo ay ku nool yihiin dad badidoodu ka yimaadeen Bartamaha/Koonfurta Soomaaliya.

Haween iyo carruur la mid ah kuwaan jooga xerada Buulo Buush ee Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Boosaaso, Waqooyiga Bari ee Soomaaliya ayaa ka-faa'iideystey taageerada UNICEF ee Caafimaadka iyo Quudinta© UNICEF Somalia 2009

Faadumo waxa ay aqoon wanaagsan u leedahay sida duumadu u faafto. Waxa ay tiri in mar kasta oo ay dhawaaqa kaneecada ka dhex maqasho buushkeeda ay welwesho. Faaduma oo haysata lix carruur ah ayaa sheegtey in iyada iyo carruurteeda ay marar badan ku dhacdey duumo. Haseyeeshee, ay hadda ay haysato fursad ka wanaagsan oo ay isaga ilaalin karto duumada iyada oo UNICEF ay la-hawlgalaheeda PUPA oo NGO degaanka ah, oo ka shaqeeya Puntland, ay dhowaan xerada dadka gudaha ku barokacay ee Garoowe ay ka qaybisey Marokaneecooyinka Cumriga Dheer ee Daaweysan.

Sharma'arke Faarax, Isuduwaha Duumada Soonka Puntland ee UNICEF ayaa sheegey in kasta oo Garoowe ay ka mid tahay soonka ay isugudbinta cudurku ay hooseyso, ay martigeliso Dad Gudaha Ku Barokacay oo ka soo guurey meelo ay duumadu aad ugu faafto oo ku yaalla Bartamaha Soomaaliya taasna ay keentey ammaan darrada sii xumaaneysa sidaa daraaddeedna ay yihiin meel ay si firfircoon uga faafi karto duumada.

Meel duumadu ku badan tahay (laga helo nisbo ka badan 20%) ayaa la qorey intii uu socdey sahan nafaqeynta la xiriira sidaa daraaddeedna UNICEF waxa ay qorsheysey in Marokaneecooyinka Cimriga Dheer ee Daaweysan si ballaaran looga qaybiyo 8da degaan ee Dadka Gudaha Ku Barokacay taas oo keentey in 2,490 qoys uu midkiiba helo labo maro kaneeco. Dadka Gudaha Ku Barokacay ee ku nool Garoowe iyo Sin-u-jiif ayaa lagu qiyaasaa 500 oo qoys.

Ilmaha Faadumo ay dhashey ee jira 18ka bilood ayaa Duumo ay ku dhacdey bishii Sebtembar ee 2008da waxaana lagu daweeyey Xarunta Caafimaadka ee Dhallaanka iyo Hooyada ee Gambool ee ay UNICEF taageerto.

UNICEF ayaa dhammaan Xarumaha Caafimaadka Dhallaanka iyo Hooyada ee Soomaaliya siisey xirmooyinka qalabka lagu baaro duumada iyo daawada duumada", ayuu yiri Sharma'arke. Faadumo waxa ay uga mahadcelisey UNICEF labadii Marokaneecada Daaweysan ee ay heshey bishii Disembar 2008da iyo in iyada iyo carruurteeda ay maanta hoos seexdaan marokaneeco.

Waxa ay weligeedba jeclaan jirtey in ay soo iibsato marokaneeco ay qoyskeeda kaga ilaaliso duumada laakiin dhaqaale uma helin marokaneecada laga heli karey suuqa oo lagu iibiyo tafaariiqdooda qiyaastii saddex doollar. Iyada oo og halista ay kaneecadu leedahay, ayaa Faadumo si aad ah u daryeeshaa marokaneecooyinka cumriga dheer ee daaweysan waxaana ay hubisaa in qoyskeedu si wanaagsan loo ilaaliyo. Waxa ay tiri 'marokaneecada ayaa keentey in si nabad ah aan u seexanno annaga oo aan ka baqeynin dhawaaqa argagaxa leh ee kaneecada.

Kor u qaadista qaybinta marokaneecada cumriga dheer ee daaweysan

Dalka Soomaaliya, ayaa cudurka duumadu ku kala badan yahay Bartamaha/Koonfurta iyo Waqooyiga. Waqooyiga Galbeed ee Soomaaliya ('Somaliland') iyo Waqooyiga Bari ee Soomaaliya ('Puntland') ayaa badiba leh tiro yar oo dad duumo ku dhacdey ah laakiin waxa ay mararka qaarkood ka dillaacdaa meelo gaar ah, halka Bartamaha/Koonfurta oo ay ku yaallaan labada webi ee waaweyn – Shabeelle iyo Jubba – oo dhex mara soonkaa, ay ka dhacaan badi xaaladaha duumada ee Soomaaliya.

UNICEF oo qaaddey dadaal ay ku yareyneyso culayska duumadu ku hayso Soomaaliya ayaa ilaa 2006dii qaybineysey Marokaneecada Cumriga Dheer ee Daaweysan.

Wiil yar oo nasaya isaga oo isku huba in aaney soo gaareyneynin halista kaneecada.© UNICEF Somalia/2005/Bbannon

"Istiraatiijiyaddan waxaa loo qaatey in la hubiyo in goob mucayin ah si weyn dadka loo gaarsiiyo marokaneecada cumriga dheer ee daaweysan si saameyn loogu yeesho ka hortagga duumada iyo xakameynteeda taas oo loo maro ilaalin guud," ayaa ay tiri Dr. Suraya Daliil, Madaxa UNICEF ee Caafimaadka iyo Nafaqeynta.

Iyada oo la shaqeyneysa in ka badan 15 NGO oo caalami ah, ayaa UNICEF ay ilaa iyo hadda Soomaaliya oo dhan ka qaybisey 1.5 milyan oo marokaneecooyinka cumriga dheer ee daaweysan ah. NGO-yada ayaa la siiyaa marokaneecooyinka cumriga dheer ee daaweysan iyo taageero dhinaca adeegga ah si ay u hubiyaan in kooxaha qaybintu ay qaaraan qoys kasta.

Iyada oo ay qayb ka tahay u qareemeyn iyo waxbarid bulsho oo adag, ayaa UNICEF hubineysaa in ka-faa'iideystayaasha marokaneecooyinka cumriga dheer ee daaweysan ay helaan xogta saxda ah ee ku saabsan isticmaalka marokaneecooyinka cumriga dheer ee daaweysan.

La hawlgalayaasha ayaa sidoo kale caawiya ka-faa'iideystayaasha iyaga oo bara sida loo soo laalaadiyo marokaneecada iyo sida loo kala bixiyo marokaneecada.

Waxaa diiradda la saaraa baahi loo qabo in mudnaanta la siiyo haweenka uurka leh iyo carruurta in habeen kasta ay hoos seexdaan marokaneeco cumridheer oo la daweeyey.

Sanadka 2009, UNICEF waxa ay higsaneysaa in ay qaybiso 350,000 oo kale oo marokaneecooyinka cumriga dheer oo la daweeyey ah ka qaybiso 12 degmo si ay u dhammeystirto degmooyinkii la beegsaneyey iyada oo sidoo kale beddeleysa marokaneecooyinkii la qaybiyey in ka badan 3 sano ka hor.

"Waxa la rajeynayaa in arrintani ay ka qaybqaadato xakameynta cudurkan oo ay u eg tahay in uu qof kasta uu beri ku dhacay," ayaa ay tiri Dr Daliil.

Iyada oo la shaqeyneysa 15 NGO caalami ah, UNICEF waxa ay qaybisey1.5 milyan oo marokaneeco…

Plumpy'doz oo lagula dagaallamayo nafaqo-xumada ka jirta Soomaaliya

Lixdii carruur ee Soomaali ahba mid ayaa qaba nafaqo-xumo ba'an, sida ay qabto qiyaastii bishii Jannaayo 2009ka ee Waaxda Lafagurka Haqab-beelka Cuntada iyo Nafaqada (FSNAU). Arrintan waxa ay ka dhigan tahay in marka hoos laga soo qabto ay 330,000 oo carruur ah ay haleeli doonto Nafaqo-xumo Ba'an, oo ah xaalad nafta halis gelisa.

Iyada oo la tixgelinayo halista weyn ee loogu jiro geeri la xiriirta nafaqo-xumada ba'an (waxa ay halista dhimahsada ee carruurta qabta Nafaqo-xumada ba'an ay sagaal jeer ka badan tahay carruurta aan qabin nafaqo-xumada ba'an), waxqabadka UNICEF ee nafaqeynta dadka mudnaanta la siiyey ee Soomaaliya ayaa ilaa dhowaanahan ku wajahnaa daaweynta nafaqo-xumada ba'an iyo wax ka qabashada qaar ka mid ah cunsurada sababta u ah – ka hortagga iyo xakameynta cudurada sida tallaalka jadeecada; bixinta fitamin A dheeri ah si kor loogu qaado difaaca jirka oo qaybna looga qaato korriimada iyo dhiirigelinta hab-dhaqan caafimaad iyo mid nafaqeyn oo habboon.

Nafaqo-xumada ba'an isma ay beddelin sanadihii la soo dhaafey maaddaama sababaha aasaasiga ah ee keena aaney fududeyn in wax laga qabto. Taana waxaa ka dhalatey in carruurtii la daweeyey ay ku soo noqoto oo ay dhibaatooyinka cusub sida abaaraha iyo barakucu ay socdaan ayna kor u kacdey nafaqo-xumada ba'an ee carruurta. Ilmaha yaryar ee lix ilaa 36 bilood jira ayaa ah da'da ay dhibaatada ugu badan ay saameysey. Dhammaadkii sanadkii 2008, UNICEF Soomaaliya waxa ay bilowdey waxqabad quudin dheeri ah iyada oo adeegsaneysa Cuntada Quudinta Dheeriga ah ee salka ay u tahay duxda *lipid* ee loo yaqaan *Plumpy'doz* oo la dhex geliyey daaweynta biyaha (*aqua tab*) iyo maareynta



Xaliimo lidow oo wiilkeeda Aadan ku quudineysa Plumpy'doz oo ah cunto u diyaarsan in la cuno xerada Buulo Eeley ee Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Boosaaso 'Puntland'.© UNICEF Somalia

shubanka (ORS) iyaga oo ka dhigan tallaabooyin looga hortagayo nafaqo-xumada.

Badeecaddan ayaa ah cunto u diyaarsan in la cuno waxaana ay u adkeysataa in ay bakteriyadu qurmiso. Qiyaastii 130,000 oo carruur (6 – 36 bilood jir) ah ayaa lagu beegsaday waxqabadkan oo socon doona muddo siddeed bilood ah. Waxqabadka ayaa badiba lagu beegsaday meelaha ay ku badan tahay nafaqo-xumada ba'an iyo meelaha ay dadku ku badan yihiin ee Waqooyiga Galbeed ee Soomaaliya ('Somaliland'), Waqooyiga Bari ee Soomaaliya ('Puntland') iyo Bartamaha/Koonfurta Soomaaliya.

Dadaalkan UNICEF ayaa kalabar ahaan lagu dhammeystirey degaannadii la beegsaday. Sida lagu ogaadey sahan ka dambeeyey qaybinta oo laga fuliyey meelo badan, in si aad ay loo oggol yahay/la jecel yahay *Plumpy'doz* ayaa lagu soo warramey. Culayska jira waxa uu yahay in bixinta qiyaastii cuntada ee ay ahayd in maalin kasta la qaato ay ku dhaqmayaan oo keliya kalabar kooxda la beegsaday; dhibaatada jirta waxa ay tahay isticmaalka wax ka badan intii lagu taliyey iyo in lala wadaago walaalaha iyo xubnaha kale ee qoyska. Haseyeeshee arrintan la soo sheegey ayaa wax looga qabanayaa iyada oo dadka la wargelinayo faa'iidada ay leedahay in la qaato qiyaastii loogu talogalay.

Daryeelayaasha carruurta ee dhammaan degaannada ayaa ku soo warramey in cuntoqaadashada, xaaladda maqaarkooda/jirkooda, heerka caafimaadka iyo tamarta carruurtoodu uu soo wanaagsanaadey ilaa iyo intii ay bilaabeen in ay ku kordhiyaan cuntada carruurta *Plumpy'doz.* Arrintan ayaa ah mid ka mid ah waxqabadyada ugu waaweyn oo dunida oo dhan laga fuliyo iyada oo la adeegsanayo badeecadan/habkaan cusub. UNICEF iyo la hawlgalayaasheeda ayaa ku ballanqaadaya in ay qoraallo ka sameeyaan casharada laga baranayo iyo saameynta uu reebo mashruucan, iyada oo isticmaalaya xogta mashruuca iyo tan ku dhisan dadweynaha. Casharada laga bartey waxqabadka Soomaaliya ayaa saameyn weyn ku yeelan doona sida mustaqbalka loo fulinayo iyo kor u qaadista waxqabadkan nafaqeynta ee Soomaaliya iyo dunida oo dhan. Waxqabadka ayaa loo fulinayaa iyada oo la kaashanayo NGO-yada caalamiga ah iyo kuwa degaanka, ururada ku dhisan bulshada iyo kuwa haweenka waxaana maaliyaddiisa badiba bixiya USAID/OFDA iyo dowladaha Denmark iyo Ingiriiska iyo sidoo kale Sanduuqa Qaramada Midoobey ee Waxka qabashada Xaaladaha Degdegga ah (CERF) ee deeq-bixiyeyaashiisu badan yihiin.

Olalaha Maalmaha Caafimaadka Carruurta Soomaaliyeed oo markii ugu horeysey wada

Wareeggii kowaad ee Bartamaha/Koonfurta Soomaaliya waxaa uu dhammaadey bishii Abriil. Hadda marka laga reegbo degmo keliya waxaa la soo marey dhammaan degmooyinka gobollada Gedo, Jubbooyinka, Bakool iyo Baay ee koonfurta. Maalmaha Carruurta Caafimaadka waxaa sidoo kale laga fuliyey gobollada Shabeellaha Dhexe, Hiiraan iyo Galgaduud ee Soonka Bartamaha/dhexe. Gobollada Banaadir iyo Shabeellaha Hoose ayaa hawshooda dib loogu dhigey sababo la xiriira gaaritaanka iyo ammaanka. Khadiija Isaaq oo ah carmal oo ku xiran qaraabadeeda si ay u quudiso afarteeda carruurta ah, ayaa adeeggan lacag la'aanta ah uu aad muhiim ugu yahay. "Waxa aan maanta keeney wiilkeeyga 4 jirka ah ee Cali si aan u helo tallaallada sababta oo ah waxa aan jeclahay in uu ku noolaado nolol caafimaad leh. Annigana waxaa sidoo kale la iga tallaaley teetanada," ayaa ay tiri. Maaddaama nisbooyinka nafaqo-xumada Soomaaliya ay aad uga sarreeyaan kuwa ugu hooseeya marka ay jiraan xaaladaha degdegga ah, waxaa isla goobta lagu daraaseeyaa xaaladda nafaqo ee carruurta waxaana la bixiyaa adeegyo soo gudbineed oo ku habboon. Xabiiba oo ah hooyo dhashey shan carruur ah, ayaa carruurteeda la timid mid ka mid ah goobaha uu ka socdey ololaha ee laga sameeyey magaalada Waajid.

Carruurteeda haysey nafaqo-xumada, laba gabdhood oo mataanayaal hal sano jira ah, ayaa isla markiiba uu shaqaalihii caafimaadka uu u direy xarun cunto ku daweyn oo u dhoweyd.

Dhammaan carruurta ka yar shan jir ayaa laga baarey nafaqo-xumo intii ay socdeen ololayaasha Maalmaha Caafimaadka Carruurta waxaana

Ilma la tallaalayo si looga hortago cudurada waqti uu socdey Ololaha Maalmaha Caafimaadka Carruurta ee sanadkii 2008da.© UNICEF Somalia

carruurta nafaqo-xumadu haysey loo direy barnaamijada quudinta ee halkaa ka dhowaan.

Halka la gaarey ka eeg tusaha Bogga 5aad

Isticmaalka Plumpy'doz ee Soomaaliya ayaa ka mid ah waxqabadyada ugu waaweyn …

Dadkii lagu gaarey Maalmaha Caafimaadka Carruurta ee Soomaaliland iyo Bartamaha/Koonfurta Soomaaliya* - 25 Disembar 2008 ilaa 30 Abriil 2009

Waxqabadka	Da'da	Tirada la gaarey	Inta la gaarey (ku dhisan dadkii la qorsheynayey ololaha)
Tallaalka Cudurka Dabaysha (OPV)	Carruurta jirta 0-59 bilood	920,245	**81%**
Tallaalka DPT 1-3	Carruurta jirta 6 toddobaad-11 bilood	215,621	**95%**
Tallaalka Jadeecada	Carruurta jirta 9-59 bilood	779,735	**81%**
Tallaalka Teetanada	Haweenka ku jira Da'da Dhalidda (15-49)	729,259	**56%**
Fitamin A dheeri ah	Carruurta jirta 6-59 bilood	802,509	**79%**
Goryaan ka dilid (*Albendazol*)	Carruurta jirta 12-59 bilood	719,549	**79%**
Cusbada Fuuq-celinta (ORS)	Carruurta jirta 0-59 bilood	936,853	**81%**
Kiininiga Sifeynta Biyaha	Carruurta jirta 0-59 bilood (loo is-ticmaalayo diyaarinta cusbada fuuq-celinta ee ORS)	949, 320	**81%**

(marka laga reeboKismaayo, Banaadir iyo Shabbeelaha ose)

Wiil yar oo la tallaalayo intii uu socdey ololaha Maalmaha Caafimaadka Carruurta ee ay UNICEF ka sameysey Bartamaha/Koonfurta Soomaaliya bishii Maarso 2009© UNICEF Somalia/2009

Maalinta Duumada Adduunka oo loo dabbaaldegey

Maalinta Duumada Adduunka ayaa 25kii Abriil 2009ka looga dabaaldegey meelo badanoo ka mid ah Soomaaliya. Xubnaha maamullada degaanka, wasiirro, xubno baarlammaanka ka tirsan, shaqaalaha Hay'adaha Qaramada Midoobey iyo kuwa NGO-yada, warbaahinta, madaxda diinta, macallimiin, xubnaha ururada haweenka, arday iyo guud ahaan dadweynaha ayaa ka qaybqaatey waxqabadyadii la sameeyey. Waqooyiga Bari ee Soomaaliya ('Puntland') ayaa Madaxweynaha Dr Cabdiraxmaan Faroole uu iftiimiyey baahida loo qabo in la sii wado qaybinta marokaneecooyinka isaga oo sheegey in dhammaan awoowayaashii xagga aabaha iyo hooyaduba ay u dhinteen duumo. "Xaaladdu sidii ay berigaa ahayd uma xuma maaddaama horumar laga gaarey dhinaca daawada. Waa in aan dhammaanteen si wadajir ah uga shaqeynaa sidii aan gobolka uga dabargoyn lahayn cudurkan dadkii laayey." Ayuu yiri.

***

25 Abriil waxa si wadajir ah loogu dabaaldegey dadaalka caalamiga ah ee ku aaddan in si taabogal ah loo xakameeyo duumada dunida oo dhan. Maalinta Duumada Adduunka waxa ay ka dhigan tahay fursad ay dhammaan dadka ay isbeddel ku keeni karaan. Haddii aad tahay dowlad, sharikad, hay'ad samafal ama shakhsi, waxa aad dib u celin kartaa duumada waxaana aad gacan ka geysan kartaa in guulo waaweyn laga gaaro dhinacyo badan caafimaadka iyo horumarinta bani'aadamka.

Wixii xog dheeri ah oo ku saabsan barnaamijkeena ama sida aad noo taageeri karto, fadlan nagala soo xiriir:

Christian Balslev-Olesen, Representative	**cbalslev@unicef.org**	**+ 254 722 514 569**
Iman Morooka, Communication Officer,	**imorooka@unicef.org**	**+ 254 714 606 733**
Dr Annie Sparrow, Malaria Programme Manager	**asparrow@unicef.org**	**+ 254 723 786 763**
Robert Kihara, Communication Officer	**rkihara@unicef.org**	**+ 254 722 206 883**

Nagu soo booqo www.unicef.org/somalia